Xeerka Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare (ESEA) waxa la ansixiyay 1965 iyada qayb ka mid ah “La Dagaallanka Saboolnimada.” Xeerka ESEA ayaa tilmaamaya in loo helo waxbarashada marin loo siman yahay. Wuxuu abuuraya qiyam sare oo ay kula xisaabtamaan hay’adaha gobolka iyo kuwa deegaankaba. Iyada oo qayb ka mid ah isbeddelladii dib-u-oggolaantii ugu dambeysay ee ESEA gudihii 2001, ee loo yaqaan Ilmana Dib Looga Tagi Maayo, ayaa dugsiyada waajib ku ah inay siiyaan waalidiinta macluumaadka soo socda:

1. Shahaadooyinka Hawl-yaqaanimo ee ay leeyihiin macallimiinta iyo taageerayaasha waxbarasho
2. Ogeysiinta haddii u macallinka ilmuhu uuna liisan sare lahayn.
3. Warbixinta horumarka ardayga shakhsi ahaan
4. Ogeysiin haddii u dugsi yahay dugsi heerkiisu hooseeyo oo loo gartay inuu yahay dugsi Ahmiyad iyo Diiraad Saar ah, iyo/ama Soo Koraya

Shaqaalaha Qodobka I, Qaybta A

Agaasimaha Qodobka I/LAP
360-725-6100

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
PO Box 47200
Olympia, WA 98504

www.k12.wa.us/TitleI

U.S. Department of Education
1-800-USA-LEARN (872-5327)

OSPI ayaa u bixisa marin siman dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada bilaa kala takoor ku saleysan rag/dumar, jinsiyadda, caqiidada, diinta, midabka, isir qaran, kuwa si sharaf leh looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada, dookh isku-tag oo ay ka mid yihiin muujinta ama isku-aragga jandar, jiritaanka naafanimo kasta oo ah kuwa dareen, dhimireed ama itaalka jidhka ah, ama isticmaalka eyga tababbaran ee hagaha ah ama xayawaan adeeg ee u qof naafo ahi isticmaalo. Su’aalaha iyo cabashooyinka ku eedeynta takoorka waa in lagu hagaajiyaa: Equity and Civil Rights Director (360) 725-6162 or P.O. Box 47200 Olympia, WA 98504-7200.

Xaqa ay Waalidiintu u Leeyihiin in Lo wargaliyo

Qodobka I, Qaybta A

Office of Superintendent of Public Instruction,
Title I/LAP Department

Shahaadooyin xirfadeed

Waalidiinta carruurta dhigta dugsiyada hela fuundada Qodobka I, Qaybta A ayaa xaq u leh iney weyddiistaan oo codsadaan macluumaad ku saabsan u qalmitaanka xirfadeed ee macallimiinta iyo kalkaaliyeyaasha ee dugsigooda oo waa inay ugu yaraan ka mid noqdaan, sida soo socota:

Macallimiin Si Fiican Ugu Qalma Hawsha

- Inuu macallinku qanciyay iyo in kale shuruudaha tababbarka iyo sharciyeynta loogu talagalay heerka fasal iyo casharka(rrada) uu isagu/iyadu dhigayo,
- Haddii u macallinku helay sharciyayn xaalad degdeg ah ama ku-meelgaar ah oo markaa shuruudaha u qalmitaanka gobolka laga dhaafay, iyo
- Wixii digrii(yada) hore iyo kuwa ka dambeeya ee tacliinta sare u macallinku haysto, oo ay ka midka yihiin shahaadooyin iyo digriiyo dheeraad ah, iyo takhasus(yada) ama ku nuuxnuuxsi mawduuc(yo).

Kalkaaliyeyaasha Tacliimeed

Haddii u adeegyo u bixiyo kalkaaliye tacliimeed, waalidiinta ayaa xaq u leh inay helaan ama weyddiistaan macluumaadka ku saabsan uqalmitaankiisa/eeda xirfadeed “paraprofessional” ka ayaa mararka qaarkood loo yaqaan kalkaaliye tacliimeed. Kalkaaliyaha tacliinta ayaa degmada shaqaaleysaa oo lagu hagaajiyaa fasalka(lada). Isaga/iyada ayaa bixiya taageero tacliin dheeraad ah oo caawiya tacliinta u bixinayo macallin(miinta) fasalku.

Dhammaan kalkaaliyeyaasha tacliinta ee qabanaya hawlaha tacliimeed ee fuundada Qodobka I, Qaybta A ay ku baxdo, iyo dhammaan kalkaaliyeyaasha tacliinta ee ku qabanaya hawlaha tacliimeed ee fuundada Qodobka I, Qaybta A dhismayaasha ku yaal dugsi oo dhan, waa inay la kulmaan shuruudo gaar ah:

- Ku dhammaystirtay ugu yaraan laba sano oo waxbarasho ah hay’ad tacliin sare; ama
- Hantay shahaado tacliin sare oo labo sano ama ka sarreysa ah; ama
- La kulmo tayo heer sare ah iyada oo loo maro midkoodba:
  - Qiimayn Kalkaaliye Tacliimeed ETS, ama
  - Barnaamij Tababbaritaan Kalkaaliye Tacliimeed oo Gobolka Washington Oggolaaday.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha kalkaalinta macallinimada Qodobka I, Qaybta A ayaa laga fiirin karaa:www.k12.wa.us/Paraeducators/pubdocs/ParaeducatorGuidelines.pdf



Ogeysiinta haddii u macallinka ilmuhu uuna liisan sare lahayn.

Waalidiintu waa inay helaan ogeysiis wakhtigeeda ah in ilmahooda in lagu hagaajiyay ama wax u dhigayay macallin aan liisan sare lahayn in ka badan afar toddobaad oo isku xigta mawduuc nuxur ah. Waxa intaa ka badan ka ogow arrimaha ku saabsan shuruudaha macallinka iyo kalkaaliyaha tacliinta internetka barta ku taal: www.k12.wa.us/TitleIIA/.

Ogaysiis
Waxyaabaha lagama maarmaanka ka ah Inta lagu gudajiro Hagaajinta Dugsiga

Xeerka Fedaraalka--ESEA--waxa uu dajinayaa gobol heer sare ah, degmo iyo ku xisaabtan dugsi, oo waxa uu agaasimaa dugsiyada dawlada ee helay Title I, Qaybta A waxa uu ka qaybqaataa lacag siinaha si loo gaadho waxqabad 100% ah: dhammaan ardaydu ay gaadhaan heerarka akadeemiga ah ee gobalka ee xisaabta iyo akhriska. Sida uu sheegayo ESEA, dugsiyada ardaydoodu ay qaateen qiimaynta dawlada oo aanay keenin heerarkan-laba sano oo isku xiga -waxay bilaabaan nidaam ay ku hagaajinayaan sanad dugsiyeedka xiga.

Waxaa jira shan talaabo oo hagaajinta dugsiga ah. Talaabo kasta dugsiyada iyo dagmooyinku waa in ay hubiyaan waalidiinta iyo ilaaliyayaashu in ay helaan sharaxaada faahfaahsan ee sababaha iyo cawaaqibyada ka qaybqaadashada dugsiga iyo sida ay ugu lugyeelanayaan waxbarashada ardaydooda. Ogeysiisyadani waa in ay noqdaan kuwo cad oo kooban. waa in aad awoodaa in aad ka saarto ogaysiisyada la xidhiidha horumarka dugsiga macluumaadka kale ee dugsiga ama degmadu u dirto guriga. Halkan waxaa ah aas aasiyaadka ay tahay in aad ka rajayso dugsiga degmada.

- Waa maxay macnaheedu in la galo barnaamij lagu hagaajinayo dugsiga
- Maxaa dugsiga loogu aqoonsaday hagaajin
- Sidee ayaa uu dugsigu isku barbar dhigaa-- si akadeemiya-- dugsiyada kale ee dagmada iyo gobolka
- Maxaa uu dugsigu qabanayaa si uu u beegsado dhibaatada.
- Maxaa uu dugsiga degmada ama goboku qabanayaa si uu u caawiyo dugsigan.
- Sidee ayaad ugu lug yeelan kartaa, oo aad ka caawin kartaa si aad u beegsato arimaha akadeemiga ah ee kugu hogaaminaya baahida loo qabo hagaajinta dugsiga
- Ikhtiyaarka Dugsiga Degmada (PSC) -- ikhtiyaarka si loogu wareejiyo ardaydaada dugsi kale oo dawladeed oo aan ku jirin Talaabo hagaajineed
- Adeegyada waxbarashada ee Dheeraadka ah (SES)—ikhtiyaarka si aad u gasho tilmaamaha daawaynta ee ilmahaaga

PSC iyo SES

Waxaan ku sharaxnay Ikhtiyaarka Dugsiga Dawlada iyo Adeegyada Dheeraadka ah laba tilmaame oo waalid ee hagaajinta dugsiga-- Ikhtiyaarka Dugsiga Dawlada iyo Adeegyada Dheeraadka ah ee Waxbarashada. .

Nalasoo xidhiidh